FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 18-aad. Garowe October 1, 2018** **Lam.11**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 11. ee 01/10/2018, kuna saabsan xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.***

*Ref:-*XGGW/DPL/ 58 /2018 Garoowe, Sabti Date:- 01/09/2018

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

**MARKUU ARKAY:** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/461/2018 ee June 27,2018 kuna saabsan soo gudbin Xeer.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:** Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 41-aad fadhigiisii 25-aad ee 16/08/2018 Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Puntland.

**Wuxuu Guddoomiyey:**

**Ansixinta Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Puntland.**

**Allaa Mahad Leh**

**Md. Axmed Cali Xaashi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

---

# XEERKA
# SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE
# DAWLADDA PUNTLAND

---

Garoowe, September/ 2018

## Tusmada Mowduuca

Bogga

**QAYBTA 1aad: QODOBBO GUUD** 5

Qodobka 1-aad Magaca iyo ujeeddada Xeerka 5
Qodobka 2-aad Astaanta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda 6
Qodobka 3-aad Saameynta Xeerkan 6

**QAYBTA 2aad: QAYBAHA, HEERARKA, KALA MUDNAANTA SHAQO XULISTA IYO WAQTIGA TIJAABADA** 7

Qodobka 4-aad Qaybaha, Heerarka iyo kala mudnaanta Shaqaalaha 7
Rayidka ah ee Dawladda Puntland 7

*Shaqaalaha rayidka ah ee dawladda waxay u qabysamaan qaybo, qayb kastana waxay leedahay heerar iyo darajooyin.* *7*

*1. Qaybaha shaqaalaha rayidka ee dawladda Puntland waxay kala yihiin 5 qaybood:* *7*

Qodobka 5-aad Mushaarka shaqaalaha 7
Qodobka 6-aad Gunnooyinka Shaqaalaha 7
Qodobka 7-aad Shuruudaha shaqaalenimo 8

*Shuruudaha ka mid noqoshada Shaqaalaha Dawladda Puntland waxaa ka mid ah:* *8*

Qodobka 8-aad Guddiga hubinta iyo Qiimeynta shahaadoonyinka 8
Qodobaka 9-aad Codsi qoris shaqaale 9
Qodobka 10-aad Shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahneyn 9
Qodobka 11-aad Imtixaanka iyo qorista shaqaalaha rayidka ee dawladda 9
Qodobka 12-aad Shaqaalaha looga baahanyahay gobollada iyo degmooyinka 10
Qodobka 13-aad Ciqaab 10
Qodobka 14-aad Muddada Tijaabada 10
Qodobka 15-aad Shuruudaha Shaqo Qoridda lagu rasmiyeen karo 10
Qodobka 16-aad Shaqo ka Saaridda Qofka Tijaabada ku jira 11

**QAYBTA 3-AAD: Magacaabista iyo ansixinta shaqaalaha dawladda** 11

Qodobka 17-aad Ansaxnaanta qorista shaqaalaha. 11
Qodobka 18-aad Wakhtiga shaqada dawladda 11

**QAYBTA 4aad: ARRIMAHA LA XIRIIRA DHIIRRIGELINTA IYO HORUMARINTA SHAQAALAHA** 11

Qodobka 19-aad Kororsiimo 11
Qodobka 20aad Dallacaad shaqaale 12

*1. Dallacaaddu waa u gudbinta qofka shaqaalaha ah heer ama darajo ka sarraysa kuwa uu hadda ku sugan yahay, waxayna dallacaaddu u kala baxdaa mid caadi ah iyo mid ah abaalmarin gaar ahaaneed.* *12*

*2. Dallacsiintu ma ahan xaq loomana dammaanad qaadayo qof kasta oo shaqaale ah iyo waqti kasta wuxuuse heli karaa dallacaad ku timaadda baahida hay'adda (Wasaaradda) iyo qiimeynta shaqo gudashada haddii uu ka shaqaynayey jagadaas muddo laba sano ah.* *12*

Qodobka 21-aad Ergeyn 13

Qodobka 22-aad Beddel shaqaale 13

1. *Beddellaadu waa wareejinta shaqaale laga wareejinayo hay'ad loona wareejinayo hay'ad kale.* 13

2. *Qofka shaqaalaha ah waxaa hay'addiisa looga beddeli karaa:* 13

b) *Hadduu dheeraad ku yahay hay'addiisa;* 13

t) *hadduu hay'ad kale ku waxtar roon yahay iyadoo xirfaddiisa loo tixgelinayo;* 13

j) *hadday maslaxadda Puntland ku jirto.* 13

*3. Beddelaadda qofka shaqaalaha ah ma beddeleyso mushaarkiisa, hase yeeshee wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha, hadday la noqoto lagama maarmaan dib waa u qiimeyn kartaa xaaladdiisa iyadoo tixgelin siineysa tacliintiisa, aqoontiisa guud iyo waayo-aragnimadiisa.* 13

*4. Beddelka qofka shaqaalaha ahi wuxuu hirgeli karaa marka ay isla oggolaadaan madaxa hay'adda qofka laga beddelayo, hay'adda loo wareejinayo iyo wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha.* 13

*5. Ansixinta beddelaadda shaqaalaha ee heerarka kala duwan waxaa loo raacayaa habka ku tilmaaman qodobka 17aad ee isla xeerkan.* 13

Qodobka 24-aad 13

Shaqaalaha ku maqan 13

Shaqo Puntland dibeddeeda 13

*Qofka shaqaalaha dawladda ahi oo shaqo loogu direy Puntland dibeddeeda haddii ay la soo gudboonaato caqabad ama dhibaato uga timaado shaqadii loo direy oo ay suurtagal u noqonweydo inuu ku soo noqdo Puntland wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo ama cid kale u wakiisho mushaarkii uu qaadan jirey ilaa iyo inta uu ku soo noqonayo Puntland ama si kale loo hubinayo xaaladda uu ku sugan yahay.* 13

Qodobka 25-aad Amarka madaxda oo aan sharciga waafaqsaneyn 14

*Marka qofka shaqaalaha ahi ka helo madaxda hay'adda amar shaqo oo aan xeerka waafaqsaneyn wuxuu samaynayaa arrimahan:-* 14

*1) wuxuu qofka shaqaalaha ahi samaynayaa qoraal uu ku caddeynayo in amarkaasi aanu xeerka shaqada waafaqsanayn, isagoo ku socodsiinaya mas'uulkii amarka siiyey ogaysiina siinaya waaxda shaqada iyo shaqaalaha ee hay'addiisa.* 14

*2) Haddii madaxa hay'addu ku adkeeyo amarkiisa qoraal uu saxiixay waa in qofka shaqaalaha ahi fuliyaa amarka madaxdiisa oo la xiriira shaqada hay'adda oo keliya* 14

*3) Haddii amarka sharci darrada ah oo la siiyey qofka shaqaalaha ah uu keeno cawaaqibxumo, waxaa falkaas mas'uul ka noqonaya madaxa amarka bixiyey* 14

Qodobka 26-aad Dadka Naafada ah 14

Qodobka 27-aad Badbaadada Shaqaalaha 14

*Caymiska iyo badbaadada shaqaalaha waxaa tifaftiraya xeer nidaamiyaha xeerkan.* 14

Qodobka 28-aad Geerida shaqaalaha 14

Qodobka 29-aad Da'da hawlgabka iyoLacagta Hawlgabka 15

Qodobka 30-aad Nidaam guud ee hawlgabnimo 16

Qodobka 31-aad Maaliyadda hawlgabka 16

Qodobka 32-aad Hawlgab iyo liiltir aan la wareejin karin 16

Qodobka 33-aad Shuruudaha lagu waayi karo hawlgabka iyo liiltirka 17

Qodobka 34-aad Oggolaanshaha iyo bixinta hawlgabka iyo liiltirka 17

Qodobka 35-aad Hawlgab Naafonimo 17

**QAYBTA 5aad: FASAXYADA SHAQAALAHA DAWLADDA** **18**

Qodobka 36aad Fasaxa Toddobaadka 18
Qodobka 37-aad Fasaxyada ciidaha iyo Maalmaha Qaranka 18
Qodobka 38-aad Fasax sannadeed 18
Qodobka 39-aad Fasax lacag la'aan ah 19
Qodobka 40-aad Fasax waxbarasho iyo tababar 19
Qodobka 41-aad Fasax bukaan 19

*1. Qofka kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda wuxuu xaq u leeyahay fasax jirro.* *19*

*2. Fasaxa bukaanka waxaa oggolaanaya madaxa hay'adda uu ka tirsan yahay bukaanku iyadoo la ogeysiinayo wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha.* *19*

*3. Qofka bukaanka ahi wuxuu keenayaa caddeyn takhtar dawladeed wixii ka badan 3 (seddex) maalmood oo jirro ah.* *19*

*4. Haddii fasaxa bukaanka la siinayo ay muddadiisu ka badan tahay 30 (soddon) maalmood wuxuu bukaanku keenaya caddeyn guddi takhaatiir dawladeed oo ay magacaabayso wasaaradda caafimaadka Puntland.* *20*

*5. Waxaa qofka bukaanka ah la siinayaa mushaarkiisa oo kaamil ah 6-da (lixda) bilood ee ugu horreysa fasaxiisa bukaan. Haddii fasaxa bukaanku ka bato lix bilood oo xiriir ah waxaa la siinayaa mushaarkiisa barkiis. Hase yeeshee, haddii jirradiisa ama dhaawiciisa ay sabab u tahay shaqada dawladda uu u hayey, waxaa la siinayaa mushaarkiisa oo dhan ilaa ay muddada fasaxiisa bukaan dhammaaneyso.* *20*

Qodobka 42-aad Fasax dhalmo, naas-nuujin iyo Aabbenimo 20

**QAYBTA 6aad: ANSHAXA IYO ANSHAX-MARINTA SHAQAALAHA DAWLADDA** **20**

Qodobka 43-aad Hab-dhaqanka Shaqaalaha 20
Qodobka 44-aad Tallaabooyinka anshaxmarinta shaqaalaha 21
Qodobka 45-aad Shaqo ka saarid 22
Qodobka 46-aad Shaqo ka tegis 22
Qodobka 47-aad Shaqo ku celin 22
Qodobka 48-aad Shaqo ka fariisin caafimaad darro awgeed 23
Qodobka 49-aad Shaqo ka saarid xaq la'aan 23
Qodobka 50-aad Shaqo ka joojin 24
Qodobka 51aad Habka qaadista dacwadaha 24
Qodobka 52-aad Joojin dacwad anshaxeed 24
Qodobka 53-aad Ku waayid dembi ciqaabeed 24
Qodobka 54-aad Cabasho 25

**QAYBTA 7-AAD: KHASAARE IYO DEYN** **25**

Qodobka 55-aad Magdhowga khasaaraha ay keennaan shaqaalaha dawladda 25
Qodobka 56-aad Deynta dawladdu ku yeelato shaqaaleheeda 26
Qodobka 57-aad Xeernidaamiyaha 26
Qodobka 58aad Sixitaan Khaladaad 26

**QAYBTA 9-AAD: QODOBBO KALE** **26**

Qodobka 59aad Gaarsiinta go'aannada iyo ogeysiisyada 26
Qodobka 60aad Wixii laga waayo xeerkan 26
Qodobka 61-aad Dhaqangalka 27

# QAYBTA 1aad: QODOBBO GUUD

## Qodobka 1-aad
## Magaca iyo ujeeddada Xeerka

1. Xeerkan waxaa loogu yeerayaa Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Puntland.
2. Ujeeddada Xeerkan waxaa ka mid ah in lagu sugo aragtida siyaasadeed iyo maamuleed ee dawladda Puntland ka yeelan karto horumarinta iyo habsami-u-socodsiinta shaqada dawladda iyo daryeelka suuban ee shaqaaleheeda.
3. Awoodda xeerkan waxay ku baahsan tahay Puntland oo dhan, wuxuuna khuseeyaa shaqaalaha dawladda Puntland sida ku qeexan faqradda 2-aad ee qodobka 3-aad ee isla xeerkan.

## Qodobka 2-aad
## Astaanta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda

1. Shaqaalaha Rayidka ahi waa ka madax-bannaan yihiin siyaasadda, waxayna qayb muhiim ah ka yihiin cududda wax soo saarka iyo hawlaha adeegga bulshada Puntland, waxayna shaqada Dawladda u gutaan si daacad ah oo wax-ku-ool ah.
2. Shaqaalaha Rayidka ah laguma waxyeellayn karo gudashada waajibaadkooda shaqo, lagama cayrin karo shaqadooda, wareejin karo, hoosna looma dhigi karo darajadooda shaqo, haddii aanay jirin sababo sharci oo macquul ah, oo aan la xiriirin fikrado siyaasadeed iyo dano gaar ahaaneed.
3. Mar kasta, shaqaalaha rayidka ahi waa inay u adeegaan danta guud oo Dawladda Puntland ku hoggaamineyso hormuudkana ka tahay. Shaqaalaha rayidka ahi uma daneeyaan garabyo siyaasadeed iyo kooxo gaar ah, waana inay u gutaan xilkooda si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Dawladda Puntland.
4. Waxaa ka reebban shaqaalaha rayidka ah inay dano gaar ah u isticmaalaan xafiisyada Dawladda ha noqdeen kuwo siyaasadeed amase kuwo kalaba.

## Qodobka 3-aad
## Saameynta Xeerkan

1. Shaqaalaha Dawladda waxaa lagu qorayaa laguna qaadanayaa hab ku salaysan aqoon iyo karti si ay u sahlanaato gudashada shaqada joogtada ah ee Dawladda Puntland.
2. Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland oo keliya.
3. Xeerkan ma saameynayo :
   B) Xubnaha Golaha Wakiillada, Golaha Wasiirrada iyo ciddii loo magacaabo shaqo siyaasadeed,

T) Ciidamada qalabka sida iyo kuwa u qaabeysan hab-ciidan,

J) Shaqaalaha ka tirsan Hay'adaha Ganacsiga iyo Bankiyada ay Dawladdu leedahay,

X) Shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo kuwa heshiisleyda ah ee hay'adaha Dawladda u shaqeeya waqti kooban oo aan ku imaan habka magacaabista Shaqaalaha Dawladda.

KH) Xubnaha Garsoorka,

D) Shaqaalaha ka shaqeeya shaqooyinka gaarka ah.

E) Shaqaalaha Dawladaha Hoose

## QAYBTA 2aad: QAYBAHA, HEERARKA, KALA MUDNAANTA SHAQO XULISTA IYO WAQTIGA TIJAABADA

### Qodobka 4-aad
### Qaybaha, Heerarka iyo kala mudnaanta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland

Shaqaalaha rayidka ah ee dawladda waxay u qabysamaan qaybo, qayb kastana waxay leedahay heerar iyo darajooyin.

1. Qaybaha shaqaalaha rayidka ee dawladda Puntland waxay kala yihiin 5 qaybood:
   b) Madaxda maamulka sare.
   t) Fuliyayaal iyo khabiiro maamul (oo leh waayo-aragnimo maamul iyo aqoon sare)
   j) Shaqaalaha darajada dhexe (Madax-Qaybeedyo)
   x) Farsamo yaqaano iyo xirfadlayaal
   kh) Adeegayaal
2. Heerarka Shaqaalaha waa 14 heer oo marka la soo gaabiyo kala noqonaya: **"A1, A2, A3, A4" "B5, B6, B7, B8, B9, B10" "C11, C12" "D13, D14".**
3. Heer kasta wuxuu yeelanayaa darajooyinka iyo jaranjarooyinka ku tilmaaman xeer-nidaamiyaha xeerkan iyo mushahar sida ku xusan qodobka 5aad ee isla xeerkan kaasoo ku xiran isbeddelka darajada iyo tallaabooyinkeeda.
4. Kala mudnaanta Shaqaalaha isku darajada ah waxaa loo fiirinayaa kala mudnaashahooda sida shaqada ama darajada ugu soo kala horreeyeen.

### Qodobka 5-aad
### Mushaarka shaqaalaha

Qayb kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka ahi sida ku xusan qodobka 4aad waxay yeelanayaan heerar iyo darajooyin mushaahar sida uu tafatiri-doono Xeer-nidaamiye xeerkan, waxaana mushahar-goynta iyo cusbooneysiintiisa u xilsaaran guddi gaar ah oo ka kooban wasaaradda maaliyadda, wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha, guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda, bankiga dhexe ee Dawladda

Puntland iyo ururrada shaqaalaha dawaladda Puntland (markay dhismaan) waxaana guddiga magacaabaya Madaxwaynaha Dawladda Puntland, marka uu helo talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhalinyarada iyo Ciyaaraha ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 6-aad
## Gunnooyinka Shaqaalaha

Arrimaha ku saabsan gunnooyinka waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiyaha xeerkan.

## Qodobka 7-aad
## Shuruudaha shaqaalenimo

Shuruudaha ka mid noqoshada Shaqaalaha Dawladda Puntland waxaa ka mid ah:

1. Waa in uu yahay muwaadin Puntlandi ah ama Soomali kale oo si rasmi u deggan Puntland oo oggolaansho qoraal ah ka haysta Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha, kaddib marka uu warbixin-asluubeedkiisa ka helo Taliska Booliska Puntland.
2. Waa in aysan da'diisu ka yarayn 18 sano.
3. Waa in uu qori karaa, akhrina karaa afka soomaaliga
4. Waa in uu ka feyow yahay cudur ka reebaya gudashada waajibaadka Shaqada laga doonayo jir ahaan iyo maskax ahaanba.
5. Waa inuu leeyahay dhaqan suuban.
6. Waa in aysan maxkamadi ku ridin xukun kama dambeysa ah oo ka reebaya ka mid noqoshada Shaqaalaha Dawladda.
7. Waa in uu haystaa shahaadada looga baahan yahay jagada loo qaadanayo.
8. Waa inuusan xiriir la laheyn urur argagixiso oo ka soo horjeeda jiritaanka Dawladda Puntland iyo qaybaha kale ee Soomaaliya ka kooban tahay.

## Qodobka 8-aad
## Guddiga hubinta iyo Qiimeynta shahaadoonyinka

1. Guddiga hubinta iyo qiimeynta shahaadooyinka wuxuu hoos yimaadaa wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare oo u xilsaaran qiimeynta shahaadoonyinka la aqoonsan karo. Guddigu wuxuu ka kooban yahay:
   - b) Agaasimaha Guud ee wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare, guddoomiye
   - t) Labo khabiir oo uu magacaabo wasiirka wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare, xubin
   - j) Wakiil ka socda guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda Puntland, xubin
   - x) Agaasimaha waaxda shaqaalaha ee wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha, xubin.

2. Waajibaadka guddiga waxaa ka mid ah:
   b) Inuu samaysto xeer-hoosaad nidaaminaya shaqadiisa;
   t) Inuu qiimeeyo shahaadooyinka la hor keeno kaddib marka uu hubsado runnimadooda;
   j) Inuu raadraac ku sameeyo shahaadoonyinka lumistooda looga soo cawdo;
   x). **Baaritaan ka dib guddigu wuxuu diyaarinayaa qoraal uu ku muujinayo natiijada baaritaanka, wuxuuna u gudbinayaa cidda ay khusayso.**

## Qodobaka 9-aad
## Codsi qoris shaqaale

1. Hay'adaha dawladdu, marka ay u baahdaan shaqaale, waxay weydiisanayaan Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhalinyarada iyo Cayaaraha oo hubin kadib u gudbineysa Gudigga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.
2. Guddigu wuxuu sida ugu dhaqsaha badan ugu dhaqaaqayaa labadan tallaabo midkood:
   b) Wuxuu hay'adda dalabka u soo gudbisey u diyaarinayaa tartameyaal leh shuruudaha shaqaalaha la doonayo oo horey imtixaan uga soo gudbey kuna jira liiska shaqaalaha kaydka ah muddo aan ka badneyn labo bilood.
   t) Wuxuu dalabka shaqaale iyo shuruudaha loo baahan yahayba ku faafinayaa wargeysyada, raadiyeyaasha, telefishinnada iyo website-yada.
3. Qoridda shaqaalaha waxay noqoneysaa tartan furan oo loo siman yahay.
4. Shaqaalaha rayidka ah ee dawladda waxaa magacaabeysa Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha sida ku xusan qodobka 17aad ee isla xeerkan.

## Qodobka 10-aad
## Shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahneyn

Qoritaanka shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahneyn sida adeegeyaasha iyo ilaaliyeyaasha iyo kuwa la midka ah oo loo qorayo hay'adaha dawladda, shirkadaha iyo hay'adaha gaarka ah, waxaa qoritaankooda u xilsaaran guddiga maamullada gobollada iyo degmooyinka, kuwaasoo si caddaalad ah u soo xulaya dadka buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 7aad ee isla xeerkaniyo kuwa u gaarka ah jagooyinka shaqaalaha loo doonayo.

## Qodobka 11-aad
## Imtixaanka iyo qorista shaqaalaha rayidka ee dawladda

1. Imtixaanaadka shaqaalaha rayidka ah loogu qorayo Dawladda Puntland waxaa qaadaya Guddiga Imtixaanaadka
2. Guddiga Imtixaanaadku wuxuu noqonayaa sidan:-
   b) Agaasimaha Shaqada iyo Shaqaalaha ee Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada & Cayaaraha Puntland
   t) Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
   j) Wakiil ka socda Wasaaradda Waxbarashada & Tacliinta Sare

x) Wakiil ka socda Wasaaradda Haweenka.

Kh) Wakiil ka socda Wasaaradda ama hay'adda shaqaalaha loo qorayo.

3. Imtixaanka waxaa lagu dejinayaa goobta imtixaanka lagu qaadayo, wakhtiga imtixaanka wax yar ka hor, Guddiga imtixaanka dejinayaa kama bixi karaan goobta imtixaanka inta imtixaanku dhammaanayo.

## Qodobka 12-aad
## Shaqaalaha looga baahanyahay gobollada iyo degmooyinka

Shaqaalaha looga baahdo Gobollada iyo degmooyinka dalka ee ah shaqaalaha looga baahan yahay aqoon iyo shahaado waxaa maamulaya Guddiga imtixaanka ee heer gobol iyo degmo, kuwaa oo noqonaya wakiillada heer gobol iyo degmo ee wasaaradaha lagu xusay qodobka 11-aad farqadiisa 2aad ee xeerkan,

## Qodobka 13-aad
## Ciqaab

1. Hay'adda dawladda waxaa ka reeban inay, si aan shuruucda Puntland waafaqsaneyn, ku qortaan shaqaale, nooc kasta ha ahaadeene.
2. Cid kasta oo qorta shaqaale aan waafaqsaneyn xeerkan, waxay muteysaneysaa ciqaab anshaxmarineed oo gaareysa shaqo ka saarid.
3. Shaqaalaha la qorey iyadoon la marinin habka shaqo qorista ee xeerkani tilmaamayo waxaa laga saarayaa shaqada.

## Qodobka 14-aad
## Muddada Tijaabada

1. Qof kasta oo markii ugu horraysey Shaqada Dawladda loo qaato waxaa lala gelayaa heshiis shaqo oo kooban, wuxuuna marayaa saddex bilood oo tijaabo ah, waana loo kordhin karaa muddada tijaabada ah ilaa laba bilood oo kale iyada oo go'aan qoraal ah ay ku soo saarayso Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha marka ay ka hesho codsi hay'adda uu ka tirsan yahay shaqsiga tijaabada ku jira.
2. Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ayaa saxiixaysa heshiiska tijaabada ah haddii aysan u idman hawshaas madaxa hay'adda ay khuseyso muddo xaddidan.
3. Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha waxay, bil gudaheed, siinaysaa qofka la shaqaaleeyey Waraqda Magacaabista Shaqaalenimo.

**Qodobka 15-aad**
**Shuruudaha Shaqo Qoridda lagu rasmiyeen karo**

1. Qoridda shaqaalaha cusub waxaa la rasmiyeen karaa:
    b) Markay dhammeystaan kuna guuleystaan muddada tijaabada
    t) Ka soo baxaan shuruudaha kale oo madaxa hay'addiisu ka dalbato.
2. Qofka tijaabada dhammeystey waxaa lagu rasmiyeen karaa ama shaqada looga eryi karaa go'aanka guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxmarinta ee hay'addiisa.

**Qodobka 16-aad**
**Shaqo ka Saaridda Qofka Tijaabada ku jira**

1. Guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxa ee hay'addu waxay shaqada ka eryi karaan shaqaalaha tijaabada ku jira ka hor dhammaadka muddada tijaabada haddii ay sugnaato in wax-qabadkiisu liito isla markaasna ay muuqato in uusan sameyneyn wax hormar shaqo-barasho ah.
2. Qofka shaqada laga saaray isaga oo aan dhammeysan muddadii tijaabada ma yeelanayo wax liiltir ah.
3. Hay'addu waa inay go'aanka guddigeeda Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee faqradda koowaad ku xusan ogeysiisaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladda iyo wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha

## QAYBTA 3-AAD: Magacaabista iyo ansixinta shaqaalaha dawladda

**Qodobka 17-aad**
**Ansaxnaanta qorista shaqaalaha.**

Qorista shaqaalaha dawladda ee darajooyinka **"A1 ilaa B5"**waxay ku ansaxaan (ansaxayaan) kuna dhaqangelaan (dhaqangelayaan) dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Dawladda Puntland, kaddib marka uu helo talo-soo-jeedinta Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha. Sidoo kaleqorista shaqaalaha darajooyinkoodu kala yihiin: **"B6 ilaa D14"** waxay ku ansaxaan kuna dhaqangelaan saxiixa Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ee dawladda Puntland.

**Qodobka 18-aad**
**Wakhtiga shaqada dawladda**

Saacadaha shaqada dawladda Puntland maalintii waa 8 (siddeed) saacadood, toddobaadkiina waa 48 (afarta iyo siddeed) saacadood

## QAYBTA 4aad: ARRIMAHA LA XIRIIRA DHIIRRIGELINTA IYO HORUMARINTA SHAQAALAHA

### Qodobka 19-aad
### Kororsiimo

1. Shaqaale kasta oo dawladeed wuxuu xaq u yeelanayaa mushahar u dhigma darajada lagu Shaqaalayey, wuxuuna heli karaa korarsiimo cayiman oo la jaanqaadi kara jaranjarooyinka ay ka kooban tahay darajada uu ku meeleysan yahay.
2. Iyada oo aan la beddelin jagada, waxaa kor loo qaadi karaa darajada iyo heerka mushaharka qofka shaqaalaha ah iyadoo la raacayo nidaamka dallacaadda shaqaalaha, si loo dhiirrigeliyo dadaalka iyo hawlqabadka shaqaalaha.

### Qodobka 20aad
### Dallacaad shaqaale

1. Dallacaaddu waa u gudbinta qofka shaqaalaha ah heer ama darajo ka sarraysa kuwa uu hadda ku sugan yahay, waxayna dallacaaddu u kala baxdaa mid caadi ah iyo mid ah abaalmarin gaar ahaaneed.

2. Dallacsiintu ma ahan xaq loomana dammaanad qaadayo qof kasta oo shaqaale ah iyo waqti kasta wuxuuse heli karaa dallacaad ku timaadda baahida hay'adda (Wasaaradda) iyo qiimeynta shaqo gudashada haddii uu ka shaqaynayey jagadaas muddo laba sano ah.

3. Goob kasta oo Shaqo dawladeed waxay yeelanaysaa guddi u qaabilsan dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxmarinta shaqaalaha, oo ka kooban:-

   b) Agaasimaha guud, Guddoomiye,
   t) Agaasimayaasha waaxyaha, Xubno,
   j) Saddex xubnood oo guddiga shaqaalaha ee goob shaqo.

4. Haddii aysan haween ku jirin xubnaha guddiga goobta shaqada ee ku xusan faqradda 3-aad ee qodobkan waxaa lagu kordhinayaa ugu yaraan hal qof oo dumar ah oo ka tirsan isla hay'addaas.
5. Waxaa qof la qori karaa, la magacaabi karaa ama la dallacsiiin karaa oo keliya haddii jago ka Bannaan tahay qaab-dhismeedka hay'adda (Wasaaradda).
6. Qofka mas'uulka ka ah habsami u socodka shaqada waa inuu talooyinkiisa la xiriira shaqaalaha u gudbiyaa guddiga ku xusan faqradda 3-aad ee isla qodobkan.
7. Guddiga goobta shaqada marka uu ka baaraandego soo jeedinta iyo warbixinta qiimeynta sannadlaha ah ee qofka shaqaalaha ah, wuxuu taladiisa u gudbinayaa madaxa hay'adda (Wasaaradda). Madaxa hay'addu wuxuu bil gudaheed go'aan ka gaarayaa talo-soo-jeedinta guddiga goobta shaqada. Haddii madaxa hay'addu oggolaado talo-soo-jeedinta wuxuu labo

toddobaad gudahood laga bilaabo taariikhda uu aqbalay u gudbinayaa go'aankiisa oo qoraal ah Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha oo iyaduna waajibaadkeeda ka gudaneysa muddo 30 maalmood gudohood ah laga bilaabo taariikhda loo soo gudbiyey go'aanka laga hadlayo.

8. Ansixin, ergin, dallacsiin ama eryid shaqaale waxaa u xilsaaran wasaaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha iyadoo ansixinta heerarka kala duwan ee shaqaalaha loo raacaysa hab-dhaqanka ku xusan qodobka 17aad ee xeerkan tixgelinna la siinayo talo-soo-jeedinta hay'adda qofku ka tirsan yahay iyo guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.

## Qodobka 21-aad
## Ergeyn

1. Ergintu waa wareejin ku meel gaar ah oo Shaqaale lagu wareejinayo
   b) Hay'ad dawladeed.
   t) Dawladaha Hoose.
   j) Hay'ad ay qayb ku leedahay dawladda Puntland
   x) Dawlado kale iyo
   kh) Hay'ad caalami ah.
2. Hawsha uu hayo Shaqaalaha erginta ku maqani waxay ka dhigan tahay Hawl dawladeed.
3. Labada hay'adood ee shaqaalaha kala ergeystay waxay samaynayaan heshiiska ergeynta, kaasoo lagu caddeynayo magaca, derejada iyo wakhtiga ergeynta. Waxayna nuqul u gudbinayaan Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada & Cayaaraha.

## Qodobka 22-aad
## Beddel shaqaale

1. Beddellaadu waa wareejinta shaqaale laga wareejinayo hay'ad loona wareejinayo hay'ad kale.
2. Qofka shaqaalaha ah waxaa hay'addiisa looga beddeli karaa:
   b) Hadduu dheeraad ku yahay hay'addiisa;
   t) hadduu hay'ad kale ku waxtar roon yahay iyadoo xirfaddiisa loo tixgelinayo;
   j) hadday maslaxadda Puntland ku jirto.
3. Beddelaadda qofka shaqaalaha ah ma beddeleyso mushaarkiisa, hase yeeshee wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha, hadday la noqoto lagama maarmaan dib waa u qiimeyn kartaa xaaladdiisa iyadoo tixgelin siineysa tacliintiisa, aqoontiisa guud iyo waayo-aragnimadiisa.

4. Beddelka qofka shaqaalaha ahi wuxuu hirgeli karaa marka ay isla oggolaadaan madaxa hay'adda qofka laga beddelayo, hay'adda loo wareejinayo iyo wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha.

5. Ansixinta beddelaadda shaqaalaha ee heerarka kala duwan waxaa loo raacayaa habka ku tilmaaman qodobka 17aad ee isla xeerkan.

6. Wareejinta shaqaaluhu sinaba wax uga dhimi mayso mushaharkiisa iyo gunnadiisa

## Qodobka 24-aad
## Shaqaalaha ku maqan
## Shaqo Puntland dibeddeeda

Qofka shaqaalaha dawladda ahi oo shaqo loogu direy Puntland dibeddeeda haddii ay la soo gudboonaato caqabad ama dhibaato uga timaado shaqadii loo direy oo ay suurtagal u noqonweydo inuu ku soo noqdo Puntland wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo ama cid kale u wakiisho mushaarkii uu qaadan jirey ilaa iyo inta uu ku soo noqonayo Puntland ama si kale loo hubinayo xaaladda uu ku sugan yahay.

## Qodobka 25-aad
## Amarka madaxda oo aan sharciga waafaqsaneyn

Marka qofka shaqaalaha ahi ka helo madaxda hay'adda amar shaqo oo aan xeerka waafaqsaneyn wuxuu samaynayaa arrimahan:-

1) wuxuu qofka shaqaalaha ahi samaynayaa qoraal uu ku caddeynayo in amarkaasi aanu xeerka shaqada waafaqsanayn, isagoo ku socodsiinaya mas'uulkii amarka siiyey ogaysiina siinaya waaxda shaqada iyo shaqaalaha ee hay'addiisa.

2) Haddii madaxa hay'addu ku adkeeyo amarkiisa qoraal uu saxiixay waa in qofka shaqaalaha ahi fuliyaa amarka madaxdiisa oo la xiriira shaqada hay'adda oo keliya

3) Haddii amarka sharci darrada ah oo la siiyey qofka shaqaalaha ah uu keeno cawaaqibxumo, waxaa falkaas mas'uul ka noqonaya madaxa amarka bixiyey

## Qodobka 26-aad
## Dadka Naafada ah

1. Xeerkani wuxuu dammaanad qaadayaa horumarinta iyo hirgelinta dhammaan tallaabooyin sahlaya helitaanka habab caawinaya dadka naafada ah, si kor loogu qaado loona taageero shaqaalaysiintooda.
2. Iyada oo la fulinayo siyaasadda dawladda Puntland, waxaa la xaqiijinayaa in dadka naafada ah la siiyo shaqooyin ku habboon tacliintooda, aqoontooda, xirfadooda, waayo-aragnimadooda iyo awooddooda si aanay naafanimadoodu caqabad ugu noqon shaqo helistooda. Xeerkani wuxuu dhiirigelinayaa in la helo dhammaan waxyaabaha ay u baahan yihiin dadka naafada ahi si loo kordhiyo ku biiritaankooda goobaha Shaqada iyo kuwa kalaba.

## Qodobka 27-aad
## Badbaadada Shaqaalaha

Caymiska iyo badbaadada shaqaalaha waxaa tifaftiraya xeer nidaamiyaha xeerkan.

## Qodobka 28-aad
## Geerida shaqaalaha

1. Qofka shaqaalaha ah ee shaqo dawladeed ku geeriyooda waxay dhaxaltooyadiisu muteysan karaan xuquuqda soo socota:
    b) Haddii qof shaqaalaha ah oo muteystey hawlgab welina shaqeynayey uu u geeriyoodo dhaawac gaarey awgiis isagoo gudanaya xilkiisa shaqo waxaa la siinayaa dadka leh dhaxalkiisa deeq lacageed oo u dhiganta lix Bilood mushaarkiisa aasaasiga ah.
    t) Haddii qof shaqaale ah ee aan weli gaarin hawlgabnimo uu u geeriyoodo dhaawac gaarey dartiis isagoo gudanaya xilkiisa shaqo, waxaa dadka dhaxalkiisa leh wax lagu siinayaa sida ku tilmaaman xarafka (b) ee isla qodobkan.
    j) Qof shaqaalaha dawladeed ah hadduu ku dhinto hawlgal ciidan ama dagaal, isagoo gudanaya hawl dawladda Puntland u xilsaartey amase ka adeegaya goob dagaal oo daafacaya dalka (Puntland) waxaa lagu xaqsiinayaa dhaxaltooyadiisa sida uu qabo sharciga hawlgabka iyo liiltirka ee ciidammada dawladda Puntland
2. Xannaanada carruurta waalidkood geeriyoodey iyagoo shaqeynaya:
    b) Haddii qof halwgab ah geeriyoodo waxay carruutiisu xaq u leeyihiin in bil walba la siiyo lacagtii uu hawlgabka u qaadan jirey ilaa ilmaha ugu yari ka gaarayo 18 sano.
    t) Sidoo kale qofka shaqaalaha ah ee muteystey hawlgab welina shaqeynayey, haddii ay ku timaado geeri caadi ah waxaa carruutiisa lagu dhaqayaa sida ku xusan xarafka (b) ee qodobkan.
3. Haddii qof shaqaale ah oo aan hawlgab xaq u lahayn ay ku timaado geeri caadi ah, dadka dhaxalkiisa leh waxay xaq u leeyihiin lacag u dhiganta bil mushaarkiisa aasaasigaah sanad kasta oo uu shaqeeyey, waxay kaloo dawladdu siineysaa deeq lacageed oo u dhiganta hal bil mushaarkiisa caadiga ah.

## Qodobka 29-aad
## Da'da hawlgabka iyoLacagta Hawlgabka

1) Da'da hawlgabka raggu waa 65 Sano, dumarkana waa 60 Sano.
2) Waxaa hawlgab la siin karaa shaqaale si xiriir ah ugu shaqayey dawladda 20 sanno ama ka badan, gaareyna da'da howlgabka,
3) Shaqaalaha aan muddada hawlgabka gaarin laakiin si joogta ah u soo hayey shaqada dawladda 5 ilaa 19 sano, waxaa la siin karaa markay shaqada ka tagaan xaq (liilitir) u dhigma bil mushaarkeed, sannad kasta oo ay shaqeeyeen.
4) Hawlgabka la siinayo qofka shaqaale ahaan, si xiriir ah ugu shaqeeyey dawladda muddo (20) labaatan sano ah ama ka badan, waxaa si faahfaahsan loogu qeexayaa xeer-nidaamiyaha xeerkan.

## Qodobka 30-aad
## Nidaam guud ee hawlgabnimo

1. Marka xeerkan laga hadlayo "mushaarka asaasiga ah" waxaa loola jeedaa mushaar-bileedka asaasiga ah ee uu qaadanayey qofka hawlgab ahi markii xiriirka shaqadu u dhammaaday iyadoo laga reebayo gunnooyinka oo dhan.
2. Nidaamka guud ee hawlgabka ee uu xeerkani dhigayo, hay'adaha dawladda xaq looguma yeelan karo wax ka badan hal hawlgab. Hase yeeshee, haddii ay dhacdo in qof shaqaale ahi, kaddib markii uu qaatey hawlgabkiisi uu dib shaqo dawladeed u bilaabo, waxaa muddada shaqadaan dambe loo xisaabinayaa mid aan joogto ahayn wuxuuna xaq u yeelanayaa liiltir u dhigma hadba muddada uu shaqeeyey.
3. Haddii qof shaqaale ah oo muteystey hawlgab ay geeri ku timaado, dhaxaltooyadiisu waxay xaq u leedahay hal hawlgab.
4. Qofka shaqaalaha ah ee galay hawlgab ma qaban karo shaqo dawladeed oo rasmi ah.

## Qodobka 31-aad
## Maaliyadda hawlgabka

1. Maaliyadda ku baxaysa hawlgabka shaqaalaha dawladda waxaa habeyneysa wasaaradda maaliyadda.
2. Maaliyadda hawlgabka waxaa lagu muujinayaa xeer nidaamiye xeerkan laga dheegtay
3. Qof kasta oo ka mid ah shaqaaalaha dawladda wuxuu ka bixinayaa boqolkii shan (5%) mushaarkiisa aasaasiga ah si loogu biiriyo maaliyadda hawlgabka.
4. Dawladdu waxay bil walba ku kordhineysaa maaliyadda hawlgabka boqolkii Shan (5%) ee mushaarka aasaasiga ah ee qofka shaqaalaha ahi ka qaato dawladda bil kasta. Lacagta

hawlgabka waxaa lagu haynayaa madax-xige u gaar ah ee miisaaniyadda dawladda lamana wareejin karo si kharaj kale loogu bixiyo.

## Qodobka 32-aad
## Hawlgab iyo liiltir aan la wareejin karin

1. Hawlgabka iyo liiltirka xeerkan ku xusan laguma reebi karo cid kale lamana wareejin karo.
2. Maxkamaddu waa joojin kartaa hawlgabka ama liiltirka qofka xiriirkiisi shaqo oo uu la lahaa dawladda dhammaaday:
   b) Haddii dawladdu deyn ama waxyaalo kale ku leedahay qofka xiriirkiisi shaqo joogsadey;
   t) Haddii dad gaar ah ku caddeystaan inuu deyn ka qabo si waafaqsan xeerka madaniga si loogu gudo deymaha uu qabo oo sugnaadey.
3. Maxkamaddu, joojinta hawlgabka ama liiltirka ka sokow, waxay kaloo amri karta in lagu bixiyo deymaha sugnaadey oo uu qabo qofka dawladda u shaqeyn jirey oo xiriirkiisi shaqo oo kala dhexeeyey dawladdadhammaadey.

## Qodobka 33-aad
## Shuruudaha lagu waayi karo hawlgabka iyo liiltirka

1. Howlgabka ama liiltirka ma muteysanayo qofka shaqada dawladda looga eryo sababaha soo socda:

   b) Tallaabo anshaxeed
   t) Xukun maxkameed oo kama dambeys ah oo aan ka yareyn seddex sano kuna saabsan ka faaiidaysasho jago dawladeed oo si sharci-darro loo isticmaaley, xatooyo xoolo dadweyne, tuugo, khiyaamo iyo dembi kasta oo ka reebaya qofka inuu qabto shaqo dawladeed.
2. Qofka shaqaalaha ah ee ku sugnaadey xaaladaha lagu xusay xarafka (b) ee faqradda 1-aad (koowaad) ee qodobkan waxaa la siinayaa lacagtii looga gooyey hawlgabka ama liiltirka.

## Qodobka 34-aad
## Oggolaanshaha iyo bixinta hawlgabka iyo liiltirka

Marka xiriirka shaqada ee ka dhexeeya qofka shaqaalaha ah iyo hay'adda uu dhammaado hawlgabka ama liiltirka waxaa oggolaaneysa Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha kaddib marka ay hesho tala bixinta Hay'adda uu qofka hawlgabka ahi u shaqeynayey, waxaana lacagta hawlgabka bixineysa Wasaaradda Maaliyadda.

**Qodobka 35-aad**
**Hawlgab Naafonimo**

Xuquuqdiisa liiltirka ama hawlgabka ka sokow, qofka shaqada dawladda uga fariistey dhaawac naafonimo oo shaqada dawladda ku soo gaarey, guddi ka kooban takhaatiir dawladeedna soo qiimeeyeen naafonimadiisa wuxuu yeelanayaa xuquuqda hoos ku qoran:

b) 15%mushaarkiisa aasaasiga ah, haddii naafadu ka hooseyso 20% ama ay tahay naafo fudud.

t) 25% mushaarkiisa aasaasiga ah haddii naafadu u dhexayso 20% iyo 35% ama ay tahay naafo dhexe.

j) 100% mushaarkiisa aasaasiga ah haddii naafadu ka sarrayso 35% ama ay tahay naafo culus.

**QAYBTA 5aad: FASAXYADA SHAQAALAHA DAWLADDA**

**Qodobka 36aad**
**Fasaxa Toddobaadka**

1. Qofkasta oo shaqaale dawladeed ahi wuxuu xaq u leeyahay maalin nasasho ah toddobaadkiiba, waana maalinta Jimcaha ah
2. Haddii qofka shaqaalaha ah looga maarmi waayo shaqo maalinta jimcaha waxaa fasaxiisa loogu beddelayaa maalin kale. Sidoo kale haddii qofka shaqaalaha ah fasixiisa jimcuhu ku beegmo maalin ciid ah wuxuu xaq u yeelanayaa inuu nasto maalin kale.

**Qodobka 37-aad**
**Fasaxyada ciidaha iyo**
**Maalmaha Qaranka**

Qofka shaqaalaha ahi wuxuu yeelanayaa nasashada maalmaha soo socda:

| | |
|---|---|
| 1. Ciidul- Fidriga | 2 Maalmood |
| 2. Ciidul- Adxaha | 2 Maalmood |
| 3. Maalinta shaqaalaha (1da May) | 1 Maalin |
| 4. 26ka June maalinta madaxbannaadi | 1 Maalin |
| 5. 1-da Luuliyo maalinta madaxbannaadi iyoMidnimada | 1 Maalin |
| 6. 1-da Agoosto maalinta aasaaska Puntland | 1 Maalin |
| 7. Bilowga sannadka Hijriga (1da Muxaram) | 1 Maalin |
| 8. Maalinta Mowliidka (12ka Rabiicul Awal) | 1 Maalin |

## Qodobka 38-aad
## Fasax sannadeed

1. Qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u leeyahay soddon (30) Casho oo Fasax ah sannadkiiba, fasaxaas oo ku habaysan maalmaha shaqada iyada oo uu mushaharkiisu u soconayo inta uu fasaxa ku jiro.
2. Madaxda Hay'adaha waa inay qorsheeyaan habka fasaxa loo bixinayo iyaga oo la tixgelinaya danta shaqada iyo shaqaalahaba.
3. Haddii ay hay'adda (Wasaaradda) qofku u shaqeeyo dan qaran awgeed uga joojiso fasaxyada, qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u leeyahay in loo kaydiyo fasaxiisa muddo labo sano ah, isagoo weydiisan karaa in dib laga siiyo ama lacag loogu beddelo.
4. Haddii qofka shaqaalaha ah oo fasaxa la siiyey looga maarmi-waayo hawl, waa lagala noqon karaa fasixiisa, dib ayaana loogu gudayaa.

## Qodobka 39-aad
## Fasax lacag la'aan ah

1. Qofka shaqaalaha ah waxaa la siin karaa fasax lacag la'aan ah oo gaari kara ilaa afar bilood seddex sano gudahood.

2. Fasaxa lacag la'aanta waxaa oggolaan kara madaxa hay'adda uu qofku ka tirsan yahay, iyadoo ogeysiis la siinayo Wasaarada Shaqada, Shaqaalaha, Dhalinyarada iyo Ciyaaraha iyo guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.

## Qodobka 40-aad
## Fasax waxbarasho iyo tababar

1. Dawladda Puntland waxay gudaheeda ama meel kale oo Soomaaliya ka mid ah ka agaasimi kartaa tababarro, kuwaas oo noqon kara kuwa farsamo ama kuwo kale oo qayb ka noqonaya qorshaha horumarinta mihnadaha shaqaalaha dawladda Puntland.
2. Si loo dhiso xirfadda iyo isku xirnaanta shaqaalaha dawladda loogana dhigo Koox shaqo oo hal ujeeddo leh, Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha waxay taabo gelisay Machadka tababarka Shaqaalaha Dowladda waxayna qabanqaabisaa tababarro ama fursado waxbarasho.
3. Haddii ay dawladda qof shaqaale ah Puntland dibeddeeda ugu dirayso waxbarasho ama tababbar la xiriira qorshaha horumarinta mihnadda shaqaalaha, Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ayaa awood u leh goynta muddada fasaxaasi uu qaadanayo iyadoo kala tashanaysaa madaxa hay'adda (Wasaaradda) uu qofku ka shaqeeyo nooca tababbarka ama waxbarashada. Muddada uu qofka Shaqaalaha ahi ku maqan yahay fasaxa tababbarka ama waxbarashada wuxuu qaadanayaa seddex meelood labo (2/3) mushaarkiisa caadiga ah.

4. Qofka shaqaalaha ah oo ay dawladda Puntland u fidiso deeq waxbarasho, waxaa laga saxiixayaa ballanqaad qoraal ah oo uu ku caddeynayo inuu dawladda u shaqeynayo muddo aan ka yareyn seddex sannadood, laga bilaabo marka uu waxbarashadiisa soo dhammeysto.

## Qodobka 41-aad
## Fasax bukaan

1. Qofka kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda wuxuu xaq u leeyahay fasax jirro.
2. Fasaxa bukaanka waxaa oggolaanaya madaxa hay'adda uu ka tirsan yahay bukaanku iyadoo la ogeysiinayo wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha.
3. Qofka bukaanka ahi wuxuu keenayaa caddeyn takhtar dawladeed wixii ka badan 3 (seddex) maalmood oo jirro ah.
4. Haddii fasaxa bukaanka la siinayo ay muddadiisu ka badan tahay 30 (soddon) maalmood wuxuu bukaanku keenaya caddeyn guddi takhaatiir dawladeed oo ay magacaabayso wasaaradda caafimaadka Puntland.
5. Waxaa qofka bukaanka ah la siinayaa mushaarkiisa oo kaamil ah 6-da (lixda) bilood ee ugu horreysa fasaxiisa bukaan. Haddii fasaxa bukaanku ka bato lix bilood oo xiriir ah waxaa la siinayaa mushaarkiisa barkiis. Hase yeeshee, haddii jirradiisa ama dhaawiciisa ay sabab u tahay shaqada dawladda uu u hayey, waxaa la siinayaa mushaarkiisa oo dhan ilaa ay muddada fasaxiisa bukaan dhammaaneyso.

## Qodobka 42-aad
## Fasax dhalmo, naas-nuujin iyo Aabbenimo

1. Hooyada shaqaalaha ahi ka sokow fasaxyada caadiga ah ee lagu tilmaamay xeerkan,waxay kaloo xaq u leedahay fasax dhalmo oo gaaraya (4) bilood oo ay qaadaneyso mushaarkeeda oo kaamil ah. Waxaa shardi ah in xaamiladdu keento caddeyn takhtareed oo muujineysa uurkeeda.
2. Xaamilladdu waxay fasaxeeda dhalmo ee ku xusan faqradda koowaad ee qodobkan u qaadaneysa sida soo socota:
    b) Labo (2) bilood waxay qaadanaysaa dhalmada ka hor;
    t) Labada bilood oo kalana waxay qaadaneysaa dhalmada kaddib.
3. Markay hooyada umushey dib ugu soo laabato shaqadeedi caadiga ahayd, waxay xaq u yeelaneysaa fasax 2 (labo) saacadood ah oo naas-nuujin ah maalin kasta oo shaqo. Fasaxa naasnuujintu wuxuu soconayaa muddo hal sano ah, laga bilaabo maalinta ay shaqada dib ugu soo laabato.
4. Aabaha loo dhalo waxaa la siinayaa fasax hal asbuuc ah oo ku aadan waqtiga dhalmada iyada oo fasaxaas uu isku dubbaridayo kormeerihiisu.

## QAYBTA 6aad: ANSHAXA IYO ANSHAX-MARINTA SHAQAALAHA DAWLADDA

### Qodobka 43-aad
### Hab-dhaqanka Shaqaalaha

1. Shaqaale kasta oo dawladda Puntland wuxuu ballan qaadayaa inuu u adeego Dadweynaha si waafaqsan Dastuurka dawladda Puntland, kuna dhisan naxariis, hufnaan, adeeg-bulsho, xushmeynta kala sarraynta maamuleed, addeecid, xajinta sirta, anshax shaqo, beekhamin, ka mira-dhalin meheredeed, dhowrista mabaadi'da caddaaladda, sinnaanta iyo hab-dhaqanka suuban.
2. Shaqaalaha dawladdu waxay u hoggaansamayaan xeerka anshax-marinta, kaas oo si tifaftiran loogu qeexayo xeer-nidaamiyaha xeerkan.

### Qodobka 44-aad
### Tallaabooyinka anshaxmarinta shaqaalaha

1. Tallaabooyinka anshaxeed ee lagu qaadi karo shaqaalaha waxay noqon karaan:
   b) Canaan afeed oo markhaati leh,
   t) Canaan qoraal ah,
   j) Ganaax aan ka badnayn 7 (toddoba) maalmood mushaarkood,
   x) Ganaax aan ka badnayn afar meelood meel (1/4) hal bil mushaarkeed,
   kh) Shaqo iyo mushaar ka joojin aan ka badnayn seddex (3) bilood, muddadaas oo aan saameyn ku yeelaneynin hawlgabkiisa iyo liiltirkiisa,
   d) Ka daahin dallacaad,
   r) mushaar ka dhimid gaari karta seddex meelood meel (1/3),
   s) Hoos u dhigid darajo,
   sh) shaqo ka saarid.
2. Tallaabooyinka anshax ee lagu sheegey xarfaha (b) ilaa (j) ee faqradda koowaad ee isla qodobkan waxaa lagu muteysan karaa:
   b)Shaqo dayicid ama naaqusid hawlqabasho,
   t)Amar diido loo qasdey,
   j)Ku-xadgudub shaqo iyo sameyn waxyaalo ka reeban qofka shaqaalaha ah,
   x)Dhaqanxumo keenta shaqo joogsata ama qasanta,
   kh)Shaqo ka maqnaasho cududaar la'aan,
   d)Wax ka qabasho la'aan shaqaalaha hoose oo ku xadgudba nidaamka shaqada.

3. Tallaabooyinka anshax ee lagu sheegey xarfaha (x) ilaa (sh) ee faqradda koowaad ee isla qodobkan, haddii aan loo gudbin maxkamad, waxaa lagumuteysan karaa:
   i. Ku-xadgub awoodeed,
   ii. Ku-xadgub waajibaad xafiis oo dhib u soo jiida hay'ad dawladeed ama dad gaar ah,

iii. Ku-tagrifal xoolo dadweyne oo qofka shaqaalaha ah lagu aaminey,

iv. Amar diido weyn,

v. Dhawris la' aan sirta dawladda,

vi. Ka faa'iideysi awoodda shaqada si dan shakhsi ah loo gaaro.

4. Tallaabooyinka anshax ee kor ku sheegan waa la kordhin karaa ama waa la dhimi karaa marka ay jiraan duruufo culeysin kara ama fududayn kara.
5. Madaxa hay'addu wuxuu awood u leeyahay inuu ku qaado shaqaalaha hay'addiisa tallaabooyinka anshaxeed ee kor ku qoran isagoo dhegeystey talada guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxa ee hay'adda arkayna go' aanka guddiga shaqaalaha rayidka ee dawladda.
6. Tallaabooyinka anshaxeed ee ku xusan qodobkan waxaa lagu hirgelinayaa xeer (dekreto) iyadoo la raacayo habraaca ku tilmaaman qodobka 17aad ee xeerkan.

## Qodobka 45-aad
## Shaqo ka saarid

Xeerkani wuxuu jidaynayaa guddiyo goobaha shaqada ee hay'ad kasta u qaabilsan dallacaadda, abaal-marinta iyo anshax marinta shaqalaaha sida ku cad qodobkiisa20aad faqraddiisa 3aad.

Qofka shaqaalaha ah waxaa shaqada looga saari karaa sababaha soo
Socda:

1. Tallaabo anshaxeed oo uu ku qaadey guddiga anshaxmarinta.
2. Xukun maxkamadeed oo kama dambeys ah.
3. Ka maqnaansho shaqada muddo bil ah cududaar la' aan.

## Qodobka 46-aad
## Shaqo ka tegis

1. Qofka ah shaqaale dawladeed oo joogto ah wuxuu xaq u leeyahay inuu qoraal ku weydiisto hay'addiisa shaqo ka tegis.
2. Hay'addu waa inay codsiga shaqo ka tegista ku oggolaataa muddo bil gudaheed ah laga bilaabo taariikhda ay heshey arjiga shaqo ka tegista kuna diyaarisaa ciddii xilka kala wareegi lahayd ruqseystaha.
3. Oggolaanshaha shaqo-ka-tegista shaqaalaha heerkoodu kala duwan yahay waxaa loo raacayaa sida habraaca ansixinta qorista shaqaalaha dawladda ee xeerkani farayo kuna xusan qodobkiisa 17aad.

## Qodobka 47-aad
## Shaqo ku celin

1. Shaqaalaha dawladda waxaa lagu celin karaa shaqada hay'adda ay ka ruqsesteen haddii ay sugnaadaan xaaladaha soo socda:
   b) Haddii shaqadooda hay'addu u baahan tahay.
   t)Haddii muddadii ay horey u shaqeyn jireen ay muujiyeen dadaal, karti iyo daacadnimo iyadoo laga shidaal qaadanayo warbixinnada iyo qoraallada qof kasta galkiisa ku jira.
2. Waxaa kaloo shaqo ku celin codsan kara:
   b) Qofka shaqaale ahaan jirey ee lagu xirey dembi ka reebaya shaqa dawladda soona dhammeystey ciqaabtii looga reebey ka shaqeynta iyo qabashada shaqo dawladeed.
   t) Haddii uu qoraal kaga codsado hay'addii uu ka tirsanaan jirey shaqo ku celin muddo labo bilood gudahood ah laga bilaabo taariikhda xabsiga laga siidaayey.
3. Waxaa kaloo shaqo ku celin weydiisan kara qofka shaqada markii hore looga fariisiyey caafimaad-darro awgeed:
   b) Haddii guddi takhaatiir dawladeed ah oo ay magacawdo wasaaradda caafimaadka ay soo caddeeyaan in caafimaadkiisu wanaagsan yahay oo uu gaarey heer uu hawshiisa si caadi ah u gudan karayo.
   t) Haddii uu qoraal ku soo codsado shaqo ku celin muddo labo sano gudahood ah laga bilaabo taariikhda shaqada laga fariisiyey.
4. Waxaa kaloo shaqo ku celin weydiisan kara qofka shaqaalaha ah oo markii hore si sharciga waafaqsan loogu oggolaadey shaqo ka tegis oo muddo hal sano gudaheeda soo codsadey shaqo-ku-celin laga bilaabo taariikhda shaqo-ka-tegista la oggolaadey.
5. Awoodda go'aan ka gaarista codsiga shaqo ku celinta waxaa yeelanaya guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxa ee hay'adda codsaduhu ka tirsan yahay waxaana lagu ansixinayaa xeer Madaxweyne ama xeer wasiirka shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha iyadoolagu dhaqmayo habraaca kala qeexaya awoodaha ansixinta qoritaanka shaqaalaha rayidkaah ee dawladda sida ku xusan qodobka 17aad ee xeerkan.
6. Qofka shaqada lagu celinayaa wuxuu xaq u yeelan karaa mushaar marka uu rasmi ahaan shaqada u bilaabo.

## Qodobka 48-aad
## Shaqo ka fariisin caafimaad darro awgeed

Qofka shaqaalaha ah waxaa shaqada dawladda looga fariisin karaa arrimo caafimaad awgood, ka dib marka la helo caddeyn Guddi takhaatiir caafimaad oo ay magacawdo wasaaradda caafimaadka codsi uga yimid madaxa hay'adda bukaanku ka tirsan yahay darti, iyadoo ogeysiis la siinayo wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha.

Qofka shaqaalaha ah oo shaqada dawladda laga fariisiyey waxaa la siinayaa wixii uu xaq oo u yeesho.

## Qodobka 49-aad
## Shaqo ka saarid xaq la'aan

1. Tallaabo anshaxeedyada ku xusan xeerka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda ka sokow, qofka shaqaalaha ah waxaa shaqada dawladda lagaga saari karaa xaq la'aan, hadday guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxa ee hay'adda hortiisa kaga caddaadaan cilladaha hakrasho, googoyn iyo curyaamin shaqada dawladda isagoo tusaale xun u muujinaya shaqaalaha dawladda si uu danihiisa gaarka ah u fushado.
2. Sugnaanshaha jiritaanka cilladaha lagu sheegey faqradda 1-aad ee qodobkan waxaa caddeyntiisa u xilsaaran guddiga shaqaalaha goobta shaqada iyo maamulka hay'adda oo wada jira.
3. Waxayna u gudbinayaan Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada & Cayaaraha Puntland.

## Qodobka 50-aad
## Shaqo ka joojin

1. Madaxa hay'addu, haddii uu u arko dan guud, wuxuu shaqada iyo mushaarka ka joojin karaa shaqaalaha lagu soo eedeeyey tallaabo anshaxeed ama faldembiyeed.
2. Madaxa hay'addu wuxuu kaloo ka joojin karaa shaqada iyo mushaarka shaqaalaha lagu soo eedeeyey faldembiyeed ama anshax-xumo haddii:

    b. maxkamadi u goysey warqadda qabashada (waaran),
    t. ay caddaato in qofka dembiga lagu soo eedeeyey uu ku noqnoqdey.

3. Muddada shaqo hakintu socoto qofka mushahar waa la siin karaa taniyo inta lagu ridayo xukun kama dambeys ah.

## Qodobka 51aad
## Habka qaadista dacwadaha

1. Dacwad kastoo anshaxeed waa in loo gudbiyaa guddiga qaadisteeda awoodda u leh iyadoo qoraal ah hal bil gudaheed laga bilaabo maalinta falku dhacay amase la ogaadey.
2. Guddiga qaadaya dacwadda wuxuu qoraal ku ogeysiinayaa dacweysanaha taariikhda dacwadda la gelayo isagoo nuqul ka siinaya dacwadda loo haysto ugu yaraan 24 saac ka hor intaan dooddu furmin.
3. Guddigu waa inuu go'aan qoraal ah ka gaaraa dacwadda loo haysto dacweysanaha, 15 maalmoodgudahood laga bilaabo taariikhda ay soo gaartey guddiga waana in ay saxiixaan go'aankooda.
4. Shirka guddigu wuxuu ansax noqonayaa hadday goobjoog yihiin 2/3 tirada guddiga.
5. Go'aanka guddiga anshax-marinta wuxuu ku ansaxayaa cod hal dheeri ah.

6. Guddigu wuxuu soo saarayaa qoraal ay ku caddeynayaan go'aanka ay ka gaareen, iyagoo u gudbinaya cidda leh awoodda go'aan ka gaarista.

## Qodobka 52-aad
## Joojin dacwad anshaxeed

1. Haddii dacwad ciqaabeed liddi ku ah qofka shaqaalaha ah ay ka socotomaxkamad, lagama furi karo dacwad anshaxeed isla falkaas maxkamadda horyaal ilaa dacwad-ciqaabeedka loo haysto qofka shaqaalaha ah ay maxkamaddu ka soo saarto xukun kama dambeys ah.
2. Haddii dacwad anshaxeedka mar hore la bilaabay waa la joojinayaa ilaa maxkamaddu go'aan kama dambeysa ah ka soo saareyso dacwadda ciqaabta oo loo haysto qofka shaqaalaha ah.

## Qodobka 53-aad
## Ku waayid dembi ciqaabeed

Qofka shaqaalaha ah oo si kama dambeys ah loogu waayey dembi ciqaabeed, waa lagu qaadi karaa dacwo-anshaxeed haddii intay socoteydacwadda ciqaabta la soo bandhigey cadaymo waajib ka dhigaya in tallaabo anshax laga qaado.

## Qodobka 54-aad
## Cabasho

1. Haddii qofka Shaqaalaha ah lagu qaadey tallaabo anshaxeed sida ku xusan qodobbada kor ku sheegan waxaa u bannaan inuu cabasho u qorto madaxa hay'adda ugu sarreeya isagoo caddeynaya waxa saldhigga u ah cabashadiisa muddo 21 (labaatan iyo kow) maalmood gudohood ah laga billaabo maalinta uu soo gaarey go'aanka uu ka cabanayo.
2. Haddii madaxa hay'addu soo saaro go'aan uu ku qanci waayo, qofka shaqaalaha ahi wuxuu awood u leeyahay inuu u dacwoodo Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ee Dawladda Puntland.
3. Haddii madaxa Wasaaradda, Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha soo saarto go'aan uu ku qanci waayo, qofka shaqaalaha ahi wuxuu awood u leeyahay inuu u dacwoodo maxkamadda sare muddo 30 (soddon) maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta uu soo gaarey go'aanka uu ka cabanayo isago raacinaya caddeymaha iyo maragmuujin kasta oo uu ku saleynayo dacwaddiisa.
4. Xukunka maxkamadda sare ka soo saarto dacwadda laga hadlayo waa kama dambeys lagamana qaadan karo rafcaan.

## QAYBTA 7-AAD: KHASAARE IYO DEYN

### Qodobka 55-aad
### Magdhowga khasaaraha ay keennaan shaqaalaha dawladda

Qofka shaqaalaha ahi waa inuu magdhaw ka siiyaa dawladda dhibaatooyinka ka dhasha waajib gudasho la'aan iyo sameynta waxyaalo sharcigani horey uga reebay.Haddii falka uu sameeyey qofka shaqaalaha ahi, kas iyo kama, midkasta ha noqodee ay dhibaato uga timaado dhinac seddexaad oo kale, waxaa magdhaw siinaya hay'adda uu ka tirsan yahay qofka shaqaalaha ahi oo dhibka geystey. Hase yeeshee, hay'addu waxay xaq u leedahay inay markeeda kula xisaabtanto qofka shaqaalaha ah oo dhibka keenay siduu hay'adda ugu gudi lahaa qaantii ay ka bixisey.

### Qodobka 56-aad
### Deynta dawladdu ku yeelato shaqaaleheeda

Haddii dawladdu qofka shaqaale ah deyn ku yeelato, sabab kasta ha ku timaadee, waxaa lacagta lagu leeyahay laga goyn karaa mushaarkiisa iyadoo bil walba laga goynayo wax aan ka badneyn ¼ (Afar meelood meel). Hase yeshee, haddii deynqabuhu shaqada ka ruqseysanayo, sabab kasta ha ku timaadee, waa inuu bixiyaa lacagta lagu leeyahay oo dhan amase laga gooyaa lacagta uu dawladda xaqa ugu yeesho.

### Qodobka 57-aad
### Xeernidaamiyaha

Xeerkani wuxuu yeelanayaa xeer-nidaamiye sharaxaad waafi ah ka bixinaya guud ahaan ujeedooyinka xeerkan shaqaalaha rayidka ah ee dawladda iyo gaar ahaan qodobbada uu ka kooban yahay, waxaana lagu soo saarayo faafinta rasmiga ah ee dawladda Puntland, kaddib marka uu soo maro dhammaan tillaabbooyinka looga baahan yahay dhaqangalkiisa.

### Qodobka 58aad
### Sixitaan Khaladaad

Haddii qof Shaqaale Dawladeed oo la eedeeyey uu qoraal ahaan ku sheego in khalad farsamo ama khalad madbacadeed uu ku jiro go'aannada ku xusan qodobadda 50aad iyo 54aad ee xeerkan, wuxuu codsan karaan in la saxo khaladaadka kor lagu soo sheegay ka hor dooda anshax marinta.

## QAYBTA 9-AAD: QODOBBO KALE

### Qodobka 59aad
### Gaarsiinta go'aannada iyo ogeysiisyada

Go'aannada iyo ogeysiisyadu waa inay ahaadan qoraal, laguna gaarsiiyaa gacan goobta shaqada qofka ay khuseyso, waxayna dhaqangelayaan isla maalinta qofka la siiyey .

### Qodobka 60aad.
### Wixii laga waayo xeerkan

Wixii laga waayo xeerkan waxaa loola laabanayaa xeer lambar 1 ee soo baxay 08/09/2005,(Xeer LR:5) kuna saabsan shaqada iyo shaqaalaha Puntland iyo lifaaqyadiisa.

### Qodobka 61-aad
### Dhaqangalka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**